Xuduudda 100 Meyl

Sida uu dhigayo Qodobka Afraad ee Dastuurka oo ilaalinaya xuquuqda dadka oo ah in la iska joojiyo oo la baaro. Inkasta oo dawladda dhexe sheegato in ay awood u leedahay in ay baari karto ogolaasho maxkamadd la'aan masaaafo ku siman 100 ee xuduudda Mareykanka , iyada oo weli la ilaalinayo xuquuqda Qodobka Afraad ee Dastuurka. Tani waxa ay kaa caawineysaa in aad fahamto xuquuqda sharcigu kuu ogolyahay ee masaafada 100 mayl ee ka baxsan xuduudda.

Saraakiisha socdaalku dadka ma ku joojin karaan gudaha Mareykanka?

Saraakiisha xuduuddaha ee Mareykanka, waa hay'ad dawladda dhexe ah oo loo xilsaaray ilaalinta xuduudaha iyo dhulka ku dhowdhow, taasoo ah dhulka xuduuda ka baxsan oo ka balaaran inta aad maleyn karto. Sharciga dawladda dhexe waxa uu dhigayaa, iyaga oo aan heysan ogolaasho maxkamadeed, waxa ay saraakiisha CBP fuuli karaan oo baaritaan ku sameyn karaan gaadiidka iyo maraakiiibta iyada oo raadinaya dadka aan heysan sharciga "masaafo macquul ah oo ka baxsan xuduudda Mareykanka." "Xuduudda ka baxsan" waxaa ka mid ah xuduudda dhulka ee caalamiga ah laakiin ku dhereran xeebaha Mareykanka.

Waa maxay "masaafada macquulka ah"?

Dawladda dhexe waxa ay ku qeexday masaafada macquulka ah ilaa 100 meyl oo ka baxsan xuduudda Mareykanka. Sidaa darteed, xeerka dawladda dhexe oo lagu lamaaniyey sharciyada baaritaanka gaadiidka ee aan loo baahneyn amar maxkamadeed, waxa ay ku doodeysaa in ay awood u leedahay in ay fuuli karto basaska ama tareenada iyada oo aan u heysan amar maxkamadeed masaafo dhan 100 meyl. Laba meel oo sadex meel tirada dadka Mareykanka ah, ama qiysaatii 200 oo milyan oo Mareykanka ah, waxa ay degan yihiin gobolada xuduudda ku dhereran, sida lagu caddeeyey tirakoobka 2010. 10Ka magaalo ee ugu balaaran Marykanka sida New York, Los Angeles iyo Chicago ayaa ka mid ah goboladaas. Gobolada qaarkood sida Florida, waxa ay ku dhacaan xuduudda oo dhan dadkuna waa ku badan yahay.

Awoodda saraakiisha socdaalku ma mid kooban baa?

Qodobka Afraad ee Dastuurka Mareykanka waxa uu ilaaliyey xuquuqda lagu baaro laguna qaato dadka iyo alaabadooda, xitaa dhulka xuduudda ka baxsan. Waxaa intaas dheer, marka si guud looga hadlayo, xuduudda sharciga ah ee saraakiishu waxa ay ku eg tahay jabinta sharciyada socdaalka iyo fal dambiyeedka dawladda dhexe. Iyo, iyada oo ku xiran goobta iyo mudda ay saraakiishu qofka heyn karaan, waa in uu jiraa shaki ay saraakiishu qabaan oo ku qancin kara in ay xabsi kugu hayaan.

Waxa aynu hoos uga hadlaynaa xaaladaha qofka soo mari kara oo saraakiisha CBP ay ku joojin karaan, laakiin waxyaabaha aad xaqa u leedahay ayaynu halkan ku xuseynaa. Kuwani waa kuwo khuseeya xalad kasta, xitaa meelaha ka baxsan xuduuuddaha laga soo galo.

- **Waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato ama aad sarkaalka u sheegto in aad ka jawaabeyso su'aalaha haddii uu qareen goob joog ka noqdo, kuma xirna dhalashadaada ama sharcigaaga.** Khasab kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha ku saabsan sharciga aad waddanka ku joogto. Waxa aad si fudud u dhihi kartaa ma doonayo in aan ka jawaabo su'aashaas. Haddii aad dooneyso in aad iska aamusnaato, waxa ay u badan tahay in sarkaalku ku weydiin doono su'aalo dheeraad ah, laakiin aamusnaantaada oo kaliya kuma filna inuu taageero u noqdo waxyaabaha ay tuhmayaan ama ay ka shakisan yihiin, ama ay baaritaan ku sameeyaan adiga iyo alaabadaada.

  Waxaa jira xaalado gaar ah: dadka ogolaashaha u heysta in ay ku nagaadaan Mareykanka sababo gaar ah dartood, ama inta badan, muddo gaaban (aan aheyn qaxooti oo dal ku gal ku jooga), sharcigu waxa uu waajib kaaga dhigayaa in aad bixiso maluumaadka sharcigaaga marka lagu weydiiyo. Adiga oo weli dooran kara in aad iska aamusnaato ama aad diido in aad ka jawaabto su'aalaha, dadka noocan ah waa in ay ogsoonaadaan in ay suurogal tahay in xabsiga loo taxaabo. Haddii aad dooneyso in aad ogaato in aad dadkaas ka mid tahay, waa in aad qareen la tashataa.
- **Guud ahaan, saraakiisha socdaalku qofna ma xiri karaan hadii aanu jirin "shaki suurogal ah"** Shaki macquul ah waa mid ka fudud tuhun suurogal ah wax dhacay, laakiin ma noqon karo oo kaliya in qofku dareemo Sarkaalku waa inuu la yimaadaa waxyaabo la taaban karo oo waxyaabaha suurogalka ah ee markaas dhacaya ama horey u dhacay, jabinta sharciyada socdaalka ama kuwa dawladda dhexe.

Haddii uu sarkaalku meel kugu hayo, waxa aad weydiisan kartaa waxyaabaha ay ku saleynayaan tuhunkooda, waana in ay kuu sheegaan.

- **Sarkaalka socdaalka ma baari karo gaarigaaga iyo adiga alaabadaada iyada oo aanu jirin "tuhun suurogal ah" ama ogolaashahaaga.** Haddii ay saraakiishu ku weydiiyaan haddii ay baari karaan alaabadaada, waxa aad oran kartaa maya.
- **Saraakiisha socdaalka kuma xiri karaan haddii uusan jirin "tuhun macquul ah "**
  Taasi waxa ay ka dhigan tahay sarkaalku waa inuu la yimaadaa waxyaabo la taaban karo oo waxyaabaha suurogalka ah ee markaas dhacaya ama horey u dhacay, jabinta sharciyada socdaalka ama kuwa dawladda dhexe.
- **Aamusnaantaada oo kaliya uma dhiganto mid ka mid ah heerarkaas. Qowmiyadaada iyo jinsiyadaada kaligeedna kuma filna in ay noqdaan tuhun macquul ah ama suurogal ah.**

Qodobada kale ee la doonayo in aad maanka ku heysaan:

- **Haddii uu sarkaalku ku weydiiyo aqoonsi, aqoonsiga aad siineyso waxa ay ku xiran tahay sharcigaaga?** Dada heysta dhalashada khasab kuma aha in ay qaataan shahaadada dhalashada haddii ay joogaan Mareykanka. Haddii aad heysato aqoonsi aan dhicin oo deganaasho ah oo aad ka weyn tahay 18 jir sharcigu waxa uu waajib kaaga dhigayaa in aad heysato aqoonsigaas. Haddii saraakiisha socdaalku ku weydiiyaan aqoonsi waa in aad tustaa, waxaa lagula talinayaa in aad tusto haddii kale xarig ayaad khatar u tahay. Haddii aad tahay qaxooti aan heysan aqoonsi, waad diidi kartaa codsiga sarkaalka. Waxaa suurogal ah in sarkaalku ku weydiiyo su'aalo dheeraad ah haddii aad diido codsiga sarkaalka. Iyada oo aan loo eegin halka aad kaga jirto, marna saraakiisha socdaalka ha siin aqoonsi been ah.

- **Dadka soo gala Mareykanka iyaga oo aan soo marin baaritaanka saraakiisha socdaalka waxa suurogal ah in laga saaro Mareykanka.** Dhoofinta la dadajiyey waa ka saarid waddanka laga saaro iyada oo aan qaali la horgeyn dadka. Dawladda dhexe waxa ay tiri waxa ay u adeegsaneysaa in ay si degdeg ah uga saarto dadka soo gala Mareykanka iyaga oo aan soo marin baaritaan ugu yaraan 14 cisho ee la soo dhaafay, oo saraakiisha xuduuddu ku qabteen ilaa 100 meyl oo xuduudda ah, oo leh shuruudaha qaarkood. Haddii lagu wargeliyo in si degdeg ah waddanka lagaaga saarayo laakiin aadan laheyn shuruudahaas, waa in aad saraakiisha u sheegtaa. Sidoo kale, haddii aad ka cabsaneyso ciqaab laguu geysto haddii aad dib ugu noqoto waddankii aad asal ahaan ka timid la socodsii saraakiisha cabsidaada.

Sidee ayey taasi u shaqeyneysaa marka ay waxyaabuhu dhacayaan?: CBP oo baaraya Basaska iyo Taareenada

Iyada oo qeyb ka ah dhaqan gelinta sharciyada socdaalka, CBP waxa ay joojiyaan basaska iyo tareenada ilaa 100 meyl oo gobolada xuduuddaha ku dhow tasoo ah xarunta basaska ama marka ay socdaan. Wax ka badan hal sarkaal ayaa fuula baska waxaana ay rakaabka weydiiyaan sharciga ay waddanka ku joogaan, iyagoo weydiiya aqoonsiga socdaalka, ama labadaba. Inta badan wa su'aalo kooban oo lagu xaqiijiyo sharciga qofka uu ku joogo Mareykanka. Inkasta oo dadka ay cabsi geliso una eg tahay in saraakiisha CBP ku siinayaan amar,khasab kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalahooda. Waxa aad u sheegi kartaa in aadan dooneyn in aad su'aalahooda ka jawaabto. Mar kasta, waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato.

Diidmada in aad ka jawaabto su'aalaha saraakiisha CBP waxa ay keeni kartaa in ay ku adkeystaan su'aalahooda. Haddii ay taasi dhcdo,waa in aad weydiisaa in ay meel kugu heynayaan. Si kale oo aad u weydiin karto waa in aad tiraahdo "xor ma ahay?" Haddii uu sarkaalku doonayo inuu meel kugu hayo — oo aadan xor aheyn in aad iska baxdo — saraakaalku waa inuu heystaa ugu yaraan tuhun macquul ah inaad jbisay sharciyada socdaalka si uu kuu xiro. Sidoo kale, haddii uu sarkaalku bilaabo inuu ku weydiiyo su'aalo ka baxsan, tusaale ahaan ku weydiiyo su'aalo la xiriira dhuumaaleysi ku galinta maandooriyayaasha, ama baska kaala soo dagaan, waa in ay heystaan ugu yaraan tuhun macquul ah oo muujinaya in aad geysatay dambi si ay kuu xiraan muddo gaaban inta uu socdo baaritaanka. Waxa aad saraakiishu weydiin kartaa sababta ay kuu xirayaan, waana in ay kuu sheegaan.

Markii ay CBP muddo ku sii hayaanba waa in ay heystaan tuhun macquul ah — ugu dambeyntana waxa ay u baahanayaan in ay heystaan tuhun keeni kara inay xabsiga muddo dheer kugu sii hayaan. Haddii ay saraakiishu ku xiraan ama baaraan alaabadaada, waxaa laga doonayaa in ay jirto sabab macquul ah oo muujineysa in aad gashay dambi. Waxa aad saraakiisha weydiin kartaa sababta ay kuu xirayaan, waana in ay kuu qeexaan tuhunka ay kugu heystaan.

Sidee ayey taasi u shaqeyneysaa marka ay waxyaabuhu dhacayaan?: Goobaha Baaritaanka ee Saraakiisha CBP

CBP ayaa maamusha goobaha baaritaanka ee socdaalka iyaga oo la shaqeeya wasaaradda arrimaha gudaha ee Mareykanka ee wadooyinka waaweyn — baaritaanka joogtada ah — iyo wadooyinka dheeraadka ah — qeyb ka ah dhaqan gelinta sharciyada. Iyada oo ku xiran goobta baaritaanka, waxaa

laga yaabaa in ay jiraan kaamarooyin ku rakiban ilaa laga gaaro goobta baaritaanka oo saraakiisha ay la socdaan eeyda urisa maandooriyayaasha. Goobaha baaritaanka oo dhan, gaari kasta wuu istaagaa waxaaana la weydiiyaa sharciga ay heystaan. Khasab ma aha in saraakiisha tuhun galo si ay u joojiyaan oo su'aalo ku weydiiyaan goobaha baaritaanka ee rasmiga ah, laakiin su'aalahoodu waa in ay noqdaan kuwo kooban oo la xiriira sharciyada dadka. Baabuurta isha ayey ku baari karaan. Gawaarida qaarkood waxaa laga yaabaa in loo diro goob lagu saeeyo baaritaan dheeraad ah oo su'aalo la weydiiyo. Waxaa sidaas loo yeelaa in la weydiiyo oo kaliya su'aalo kooban oo dadka oo dhan laga weydiiyo sharcigooda laakiin aan gaari kasta la weydiin karin gaadiidka maraya goobta baaritaanka oo fara badan darteed. Haddii aad soo gaarto goobta baaritaanka adiga oo gaari wata, marna haka cararin — waa dambi culus.

Sidii hore oo kale, marka aad soo gaarto goobta gaadiidka lagu baaro, waad iska aamusnaan kartaa, u sheeg sarkaalka in aadan ka jawaabeyn su'aalahooda ama in aad su'aalaha ka jawaabeyso oo kaliya haddii qareen goob joog yahay. Diidmada aad diido in aad ka jawaabto su'aalaha saraakiisha waxa ay u badan tahay in ay keeni karto in meel lagugu hayo ama baaritaan dheeraad ah laguu diro ama labadaba. Haddii sarkaalku ku weydiiyo su'aalo aan la xiriirin socdaalka ama ay muddo dheer qaadato xilliga uu ku weydiinayo ee la xiriira sharcigaaga, waa in sarkaalku heystaa tuhun macquul ah oo muujinaya in aad geysatay dambi ama aad jabisay sharciga dawladda dhexe oo aad la timid wayaabo sharci daro ah. Haddii lagugu hayo goobta baaritaanka wax ka badan muddo gaaban oo su'aalo lagu weydiiyo, waxa aad sarkaalka weydiin kartaa haddii aad xor tahay in aad iska tagi karto. Haddii ay yiraahdaan maya, waa in ay heystaan tuhun macquul ah si ay kuu sii hayaan. Waxa aad saraakiisha weydiin kartaa waxyaabaha ay ku saleynayaan tuhankooda, waana in ay kuu sheegaan. Haddii ay saraakiishu ku xiraan, kugu hayaan goobta muddo dheer, ama baaritaan ku sameeyaan alaabadaada ama garigaaga waa in sarkaalku heystaa tuhun macquul ah in aad jabisay sharciyada socdaalka ama kuwa dawladda dhexe. Waxa aad saraakiisha weydiin kartaa waxyaabaha ay ku saleynayaan tuhankooda. Waa in ay kuu dheegaan.

Sidee ayey taasi u shaqeyneysaa marka ay waxyaabuhu dhacayaan?: Ilaalada wareegta ee CBP

CBP waxa ay sameeyaan hawl kale oo la xiriirta ilaalinta sharciga; ilaalada wareegta. Mudada ay ilaalada ku jiraan, saraakiisha CBP waxa ay ku wareegaan wadooyinka iyaga oo joojiya gaadiidka. Hawlgaladaas, Maxkamadda Sare waxa ay waajib kaga dhigeysaa CBP in ay hayaan tuhun macquul ah wadaha gaariga ama rakaabka gaariga ee ay joojiyaan in ay jabiyeen sharciyada socdaalka ama geysteen faldambiyeed. Haddii ay ku joojiyaan, su'aalaha sarkaalku waxa ay ku kooban yihiin oo kaliya tuhunka ay kuu joojiyeen mana dheereyn karaan mudada ay ku joojiyaan iyaga oo ku weydiinaya su'aalo dheeraad ah oo aan la xiriirin sababta joojinta. Xarig ama joojin muddo dheer ah waa in uu jiraa tuhun macquul ah. Waxa aad saraakiisha weydiin kartaa waxyaabaha ay ku saleynayaan tuhankooda, waana in ay kuu sheegaan. Xaaladaas, wadaha gaariga iyo rakaab kasta oo gaariga saaran waxa ay xaq u leeyihiin in ay iska aamusnaadaan oo aysan ka jawaabin su'aalaha ku saabsan sharcigooda.